

# Waalidnimada xilliga kala tagga

Vanhemmuus erotilanteessa (somalí)



## Waalidnimo iyo kala tag

- Kala taggu waa xaalad adag oo ku ah qoyska oo dhan.
- Waxay kicisaa dareenno xooggan oo ku dhaca waalidiinta iyo carruurta.
- Kala tagga awgiis, degganaanshaha iyo arrimo kale oo badan waa in dib loo habeeyaa.
- Waxay dan ugu jirtaa ilmaha in la ilaaliyo xiriirka labada waalidba inta lagu jiro kala tagga iyo ka dibba.

Inkasta oo xiriirka lamaanaha ee dadka waaweyn uu dhammaado, waalidnimada wadajirka ahi haddana way sii socotaa.



## La kulanka kala tagga iyadoo lala joogo ilmaha

- Way wanaagsan tahay in labada waalidba joogaan marka ilmaha loo sheegayo kala tagga.
- Waxaa habboon in isla markiiba ilmaha lala hadlo marka go'aanka kala tagga la gaaro oo waalidiintu weli ku wada nool yihiin isla guriga.
- Waalidiintu iyagaa ugu aqoon badan ilmahooda, waxayna ogyihiin sida ugu habboon ee arrintan ilmaha loogala hadli karo.
- Waa muhiim in ilmaha loo sheego waxa kala taggu ka dhigan yahay iyo waxa ficiil ahaan dhici doona.



## Saamaynta kala tagga waalidiinta ku leedahay ilmaha

- Ilmo kasta si gaar ah ayuu uga falceliyaa kala tagga waalidiinta.
- Falcelinta ilmaha waxaa saameeya, tusaale ahaan, da'da iyo dabeecadda ilmaha, iyo sidoo kale tayada noloshi qoyska ee ka horreysay kala tagga iyo awoodda wada-shaqayneed ee waalidiinta kala tagga ka dib.
- Ilmuhu wuxuu arki karaa riyooyn cabsi leh, wuxuu dareemi karaa cabsi laga qabo in la dayaco ama wuxuu dareemi karaa dambi.
- Sidoo kale dabeecadda ilmaha way is beddeli kartaa, ilmuhuna wuxuu noqon karaa mid ka madax adayg badan ama ka go'doon badan sidii hore.

U oggolow ilmaha inuu cabbiro aragtidiisa ku saabsan kala tagga. U oggolow ilmaha inuu kala tagga ka hadlo mar kasta oo uu doono iyo cidda uu doono.

Dhegayso fikradaha iyo rabitaannada ilmaha ee ku saabsan nolosha kala tagga ka dib. Maxay yihiin waxyaabaha muhiimka u ah ilmaha?



## La qabsiga kala taggu wuxuu qaataa waqti

- Ilmuhu wuxuu la kulmaa waxyaabo badan oo cusub marka qaab-dhismeedka qoyska is beddelo.
- Badanaa ilmuhu wuxuu u guuraa guri cusub, kooxdiiisa saaxiibbaduna way is beddeli kartaa. Sidoo kale xannaanada ama iskuulka way is beddeli karaan.
- Maalmaha ciidaha, maalmaha dhalashada iyo waqtiyada kale ee gaarka u ah ilmaha, dareenka khasaaraha ee ilmuhu dareemayo wuu sii xoogaysan karaa.
- Ilmuhu weli ma fahmayo joogteynta kala tagga, sidaas darteed ilmuhu si soo noqnoqota ayuu wax uga weydiin karaa waalidka maqan.
- Kala taggu wuxuu sidoo kale ilmaha u noqon karaa nafis haddii xiriirka waalidiinta ay ku jireen khilaafyo iyo iska horimaadyo badan.



## Waalidnimada kala tagga ka dib

- Waalidiintu waxay ka heshiiyaan daryeelka ilmaha, degganaanshaha, kulamada iyo lacagta masruufka.
- Marka laga eego dhinaca ilmaha, waxa ugu wanaagsan waa in waalidiintu arrimaha ku heshiiyaan si wadajir ah.
- Haddii waalidiintu ku heshiin waayaan arrimaha, go'aanka waxaa gaara kormeeraha carruurta ee deegaanka nolol-wanaagga ama maxkamadda degmada.
- Wadaagidda mas'uuliyadda carruurta waalidiintu si wadajir ah ayay uga go'aamiyaan arrimaha ilmaha.
- Waalidka keligiis mas'uul ah isaga ayaa go'aamiya arrimaha ilmaha.
- Ilmuhu wuxuu la noolaan karaa mar kasta mid ka mid ah waalidka ama si is-beddel ah labadooda waalidba.
- Waa muhiim in la tixgeliyo sii wadidda nolol-maalmeed sida ugu caadisan oo ammaan ah inta lagu jiro isbeddellada waaweyn.

Xasuu snow in ilmuhu MAR WALBA xaq u leeyahay inuu la kulmo labada waalidba.



## Waalidnimada kala tagga ka dib

- Arrimaha iyo dareennada la xiriira kala tagga lagama hadlo ilmuhu isagoo maqlaya.
- Ilmuhu waa inuusan gelin dhexda muranka waalidiinta ama dareemin cadaadis ku qasbaya inuu dhinac la safdo mid ka mid ah waalidiinta.
- Sidoo kale ilmuhu waa inuusan qaadan doorka waalidka ama dareemin baahi uu ku ilaaliyo waalidkiisa.
- Waxay muhiim u tahay ilmaha in waalidku weli tixgeliyo baahiyaha ilmaha oo uu noqdo mid ammaan ah, inkasta oo xiriirka waalidiintu dhammaaday. .
- Waalidiintu waa inay awoodaan inay si wanaagsan oo dabacsan iskula hadlaan arrimaha iyo korinta ilmaha.





**Euroopan unionin  
osarahoittama**

Mashruuca Niitty 2 2023–2026

*Si wadajir ah loogu hiilinayo nolol-  
maalmeedka wanaagsan ee qoysaska soo-  
galootiga ah*

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan  
mashruuca: [projects.tuni.fi/niitty2](https://projects.tuni.fi/niitty2)

Bogga agabka Perheinfo: [tuni.fi/perheinfo](https://tuni.fi/perheinfo)

Warqaddan tilmaamuhu waxay ku salaysan tahay shaqo cilmiyeed laga sameeyay jaamacadda tacliinta sare ee xirfadaha Tampere: Kuustie, J & Tamminen, A. 2026. Barnaamijka waxbarashada kalkaaliyeyaasha caafimaadka.

Lifaaqyada muhiimka ah:

Pruuki, H. & Sinkkonen, J. 2017. Lapsi ja ero: Eväitä eteenpäin. Helsinki: Kirjapaja.

Cohen GJ, Weitzman CC. 2016. Helping children and families deal with divorce and separation. Pediatrics. 138 (6). <https://doi.org/10.1542/peds.2016-3020>

Lastensuojelu.info. 2022.

Verkkosivu. <https://www.lastensuojelu.info/sf/vanhemmuus-ja-parisuhde/erotilanteet/>

Korhonen, L. 2021. Osa III Lasten tavallisia pulmia; Vanhempien ero. Teoksessa Sinkkonen., J. & Korhonen., L. (toim.) Pulassa lapsen kanssa. 2., uud. painos. Kustannus Oy Duodecim.

Verkkosivu. <https://www.terveyskirjasto.fi/pla00032/vanhempien-ero>

Sawirrada: ChatGPT iyo Microsoft Copilot aaladaha sawir-samaynta



**Pirkanmaan  
hyvinvointialue**



**TAMPERE**